

# Waxaa hadda kaddib goobaha barbaarin-horaadka ee Helsinki laga codsanayaa islamarkaasna laga bixinyaaa hal meel

Hawsha ka baaraandegista iyo samaynta go'aannada codsiyada barbaarin-horaadku waxay laga billaabo Oktoobar u wareegeysaa hagayaasha adeegga ee waaxda hagitaanka adeegga barbaarin-horaadka iyo waxbarasho-horaadka. Waxaa isla wakhtigaas la dhaqangeliyaa isticmaalka adeegga danqabsashada ee Asti, marka booska barbaarin-horaadka laga codsanayo barbaarin-horaadka ku baxda afka finnishka. Maamulayaasha xannaano-maalmeedyada, hagayaasha xannaano-maalmeedyada qoyska iyo hagayaasha jardiinooyinka ciyaarta ee madaxda ah ayaa illaa iyo wakhtigan la joogo ka baaraandegayay islamarkaasna go'aan ka gaarayay codsiyada barbaarin-horaadka.

Hadafka dib u habayntan laga leeyahay waa bixinta boosaska barbaarin-horaadka oo sidii hore ka shaqo fudud. Marka ay dib u habayntan horay u socoto waxay xannaanooyinku helayaan marka lagu jiro marxaladda billaabidda wakhti kii hore ka badan oo ay u adeegsadaan qaabilaadda ay qoysaska iyo carruurta ku qaabilaayaan barbaarin-horaadka.

Mabda' xannaano-maalmeedka ugu dhow ee Helsinki ka jira ayaa ah mabda' ugu muhiimsan ee waxqabadka haga- Waxay tani ka dhigantahay, in markasta boos laga siinayo goobta shaqada ee guriga ugu dhow oo uu boos ka bannaan yahay. Meel isugu keenista hagitaanka adeegga barbaarin-horaadka iyo waxbarasho-horaadku waxay wanaajinaysaa hirgelinta mabda' ku dhisan xannaanada ugu dhow.

Isbeddelka ku yimid hagitaanka adeeggu waxba kama beddelayo sababaha loo cuskado bixinta booska barbaarin-horaadka. Sababahaas waxaa laga helaa [hel.fi/sivustolta](http://hel.fi/sivustolta).

Macluumaadka ku saabsan hagitaanka adeegga waxaa laga helaa bogga hel.fi, hagayaasha adeegga iyo jardiinooyinka ciyaarta. Waxaa hagitaanka adeegga barbar socda oo la horumarinayaa adeegga danqabsashada ee Asti, kaas oo isticmaalkiisa qayb-qayb loo billaabayo.

## Isticmaalka adeegga danqabsashada Asti ee barbaarin-horaadka

Illaa iyo wakhtigan la joogo waxaa adeegga danqabsashada Asti boos looga codsan karay barbaarin-horaadka ku baxa afka iswiidhishka. Codsiga barbaarin-horaadka ku baxa afka finnishku wuxuu Asti ka furmayaa bisha Oktoobar. Codsiyada kale ee barbaarin-horaadka iyo waxbarasho-horaadka waxaa weli lagu samaynayaa habka hadda la isticmaalo, yacni waxaa lagu samaynayaa adeegga elektroonigga ah ee magaalada Helsinki. Bogaggeena shabakadda ayaan inta dayrta lagu jiro si faahfaahsan ugu soo gudbinaynaa isbeddellada soo socda.

### Macluumaad dheeraad ah:

madaxa adeegga barbaarin-horaadka  
Sanna Haapanen



[sanna.haapanen@hel.fi](mailto:sanna.haapanen@hel.fi)  
tel 09 310 27118

ku simaha maamulaha barbaarin-horaadka  
Ulla Lehtonen  
[ulla.lehtonen@hel.fi](mailto:ulla.lehtonen@hel.fi)  
tel. 09-310 44655

ku simaha maamulaha waaxda  
Satu Järvenkallas  
[satu.jarvenkallas@hel.fi](mailto:satu.jarvenkallas@hel.fi),  
tel. 09 310 43368